



## Qofkii dhib gaysta Ilaahay ayaa dhiba, Qofka dadka wax ku adkeeyana Ilaahay ayaa wax ku adkeeya

Abii Sirma Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Qofkii dhib gaysta Ilaahay ayaa dhiba, Qofka dadka wax ku adkeeyana Ilaahay ayaa wax ku adkeeya ."

[Xadiis Xasan ah] [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At-Tirmidi, Ibnu Maajah, Iyo Axmed]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ka digay in Muslimka dhib loo gaysto, ama la dhibaateeyo shay arimihiisa ka mida sida Naftiisa, maalkiisa iyo reerkiisa, Qofkii sidaa sameeyana Ilaahay ayaa ka abaal marin kuna ciqaabidoona nooca camalkiisa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5375>

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

